

Su'aalo iyo Jawaabo ku saabsan Laanta Xuquuqul Iisaanka Menesota

Waa maxay Laanta Xuquuqul Iisaanka Menesota (MDHR: Minnesota Department of Human Rights)?

Laanta Xuquuqul Iisaanka Menesota waa laan gobol oo aan dhinacna taageersanayn oo baadha dacwada ku saabsan takoorka sharci darada ah.

Ilaa intee ayaan xarayn karaa dacwada takoorka?

Sanad laga bilaabo maalinta takoorku dhacay.

Ilaa intee ayey ku qaadanaysaa inay Laanta Xuquuqul Iisaanka Menesota baadho kiiska?

Waxay qaadan kartaa ilaa sanad laga bilaabo maalinta dacwada la xareeyey.

Miyaan u baahanahay gar yaqaan si aan dacwad laanta uga xareeyo?

Maya. Laakiin waad yeelan kartaa hadii aad mid doonaysid. Waa inaad adigu qabsataa kharashkiisa bixisaa. Anagu kuma siin karno talo siin sharci.

Waa intee qiimaha lagu xaraynayo dacwadu?

Qiime lagu xareeyo ma jirto.

Miyaa la i ciqaabi karaa hadii aan xareeyo dacwad takoor ku saabsan?

Waa sharci daro inuu qof ku ciqaabaa – ama kaa aargoosto maadaamo aad xaraysay dacwad takoor.

Ciqaabata aargoosashada noocani ah waxa loo yaqaan “rogaal celin.” Waxaad gooni u xarayn kartaa dacwad takoor – wakhtigani rogaal celinta awgeed kuna socota qofka kugu ciqaabaya inaad xaraysay dacwadii koowaad.

Waxaan helay warqad odhanaysa dacwadaydii waxa laga xareeyey (Gudida Siniinta Shaqada) (EEOC: the Equal Employment Opportunity Commission). Waa maxay warqadani micnaheedu?

Laanta Xuquuqul Iisaanka Menesota waa laan gobol. Gudida Siniinta Shaqadu (EEOC) waa laan dawlada dhexe leedahay oo ka shaqaysa kiisaska takoorka shaqada. Labada laamoodba waxay ku heshiin karaan inay isku gaabilaan dacwadaha takoorka. Dacwadu waxay noqonaysaa mid “ka xaraysan mid kaliya.” si ay laan kali ahi u baadho sheegada.

Warqad ku saabsan in mid dacwadaada lag xareeyey ayaa kuu sheegi doonta sida gobolka iyo laamaha dawlada dhexe u wada shaqeeyaan. Lagaagama baahna inaad wax qabatid dacwada laga xareeyey mid kaliya marka laga reebo inaad ogaysiiskaaga duwaan gashato. Labada laamoodba waa inaad u sheegtaa hadii uu ciwaankaagu ama telefankaagu is badelo.

Waxaan Gudida ka helay warqad kala guura. Wali waxaan umalaynayaa in si cadaalad daro ah la iila dhaqmay waxaan doonayaa inay Laanta Xuquuqul Iisaanka Menesota sii wado baadhitaanka dacwada. Maxaan qaban karaa?

Waxaad codsan kartaa in kiiskaaga dib loo qiimeeyo. Waa inaad qoraal ku codsataa.

Miyey jiraan laamo kale oo i caawiya?

Haa. Laamo kale oo ah kuwo gobol iyo kuwo dawlada dhexba way ku caawin karaan shaqooyinka qaarkood ama dhibaatooyinka guryaha.

Laanta Shaqaalaha Warshadaha ee Menesota (DOLI: Department of Labor and Industry)

Laanta Shaqaalaha Warshadaha ee Menesota (DOLI: Department of Labor and Industry) waa laan gobol oo hirgalisa sharciga ku saabsan shaqooyinka oo ay ka mid yihiin:

- Wakhtiga dheeraadka ah ee aad shaqaysay,
- Xiliyada qofku nasan karo,
- Dhaawaca kaaga yimaada shaqada iyo
- ammaanka shaqada

Hadii aad u baahato kaalmo ku saabsan waxyaabahani, waa inaad la soo xidhiidhaa iyaga si aad u heshid macluumaad dheeraada.

Telefoon:

651-284-5005

Khadka Bilaashka ah: 1-800-342-5354
Dadka maqalku ku adag yahay (TTY): 651-297-4198

Ciwaan:

443 Lafayette Road N
Saint Paul MN, 55155-4307

[Shebakada internadka \(Web site\):](http://www.dli.mn.gov/main.asp)

<http://www.dli.mn.gov/main.asp>

**Gudida Siniinta Shaqada Maraykanka (EEOC: Equal Employment
Opportunity Commission)**

Gudida Siniinta Shaqada Maraykanka (EEOC: Equal Employment Opportunity Commission) waxay baadhaan takoorka ka dhaca shaqada. Waxaad xarayn kartaa dacwad takoora adiga oo ka xaraynaya Gudida Siniinta Shaqada ama anaga ayaad naga xarayn kartaa, xuquuqdaada gobolka iyo ta dawlada dhexba waxa ilaalinaya dacwadani. Labad laamoodba haka wada xarayn.

Telefoon:

612-335-4040
Khadka Bilaashka ah: 1-800-669-4000
Dadka maqalku ku adag yahay (TTY): 612-335-4045

Ciwaanka:

Towle Building
330 South Second Avenue, Suite 720
Minneapolis, MN 55401-2224

[Shebakada internadka \(Web site\)](http://www.eeoc.gov/minneapolis/index.html)

<http://www.eeoc.gov/minneapolis/index.html>

Laanta Guriyeynta iyo Horumarinta Magaalada (HUD: United States Department of Housing and Urban Development)

Laanta Guriyeynta iyo Horumarinta Magaalada (HUD: United States Department of Housing and Urban Development) ayaa hirgalisa sharciga cadaalada guryaha dawlada dhexe. Sharciyadani waxay isku dhow yihiin sharciyada Menesota ee aanu hirgalino. Waxaad dacwad gooniya ka xarayn kartaa Laanta Guriyeynta iyo Horumarint Magaalda.

Telefoon:

612-370-3000

Dadka maqalku ku adag yahay (TTY): 612-370-3186

Ciwaan:

Kinnard Financial Center
920 Second Avenue South Suite 1300
South Minneapolis, MN 55402-4012

[Shebakada internadka \(Web site\)](http://www.hud.gov/local/index.cfm?state=mn&topic=offices)

<http://www.hud.gov/local/index.cfm?state=mn&topic=offices>

Maxaan ka qaban

Hadii aad u malaynaysid inaad tahay dhibane takoor:

- Qor wixii kugu dhacay hadii aad u malaynaysid inay cadaalad daro ahayd.
- Qor taariikhihii ay cadaalad daradaasi dhacday.
- Qor magacyada dadkii kale ee joogay.
- Qor wixii dadkii halkaasi joogay yidhaahdeen.

Ha baajin!

Mar marka qaarkood way adag tahay inaad garatid wixii takoora iyo wixii aan takoor ahayn – marxad kastaaba waa gaar. Laakiin hadii aad umalaynaysid inaad tahay dhibane takoor, ha baajin.

Si deg deg aula soo xidhiidh Laanta Xuquuqul Iisaanka Menesota. Waxaad haysataa sanad inaad dacwada ku xaraysid laga bilaabo kadib markii uu takoorku dhacay.

Waxaan telefoonka ka jawaabnaa Isniinta – Jimcaha, 8:00 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo

Telefoon

651-296-5663

TTY: 651-296-1283 (Dadka maqalku ku adag yahay)

Khadka bilaashka ah: 1-800-657-3704

Sidii loo heli lahaa turjumaan

Hadii aad u baahan tahay turjumaan si aad ula hadashid xafiiskayaga, waxaanu ku siin doonaa mid bilaasha. Waxaanu leenahay shaqaale naga tirsan oo ku hadla Af-Isbaanish iyo Af-Hamang.

Nala soo hadal adiga oo odhanaya, "I need a Somali interpreter."

Uma baahnid balan inaad xafiiskayaga ka dhigatid si aad u soo booqatid

Waxaanu qaabilnaa dadka lugta ku yimaada 9:00 subaxnimo ilaa 4:00 galabnimo, Isniin - Jimce.

Ciwaankayaga

Minnesota Department of Human Rights
Freeman Building
625 Robert Street North
Saint Paul, MN 55155

Email address

info.MDHR@state.mn.us

If you are emailing the department about filing a charge of discrimination and do not receive a reply within five business days, please contact our intake unit by phone at 651-296-5663 (TTY 651-296-1283) or Toll Free at 800-657-3704.

The Minnesota Department of Human Rights wishes to acknowledge Precision Language Services' generous contribution of time and language translation expertise on this document.